Co-funded by the European Union

HADAL XURMADEED

Qore: Selcuk Kirbac

Magaca Hawsha: Weedho Xushmad leh

Macnaha Guud: Hawshani waxay muujinaysaa muhiimadda weedhaha xushmadda leh oo ah buundo u dhexeysa luqadda iyo dhaqanka.

Ujeeddo: Ujeeddada hawshan waa in ardayda lagu baro weedho xushmad leh oo door muhiim ah ka ciyaara erayada af-Turkiga, in la muujiyo macnaha erayadan af-Turkiga, iyo in la sharaxo sida weedhahan ay uga tarjumayaan dhaqanka Turkiga ee luqadda.

Waxyaabaha ku jira: Hawshan waxaa lagu qorsheeyay oo lagu fuliyay laba cashar. Casharka koowaad, ardayda waxaa lagu baray xaaladaha weedhahan sdai caadi ah loogu isticmaalo af-Turkiga, iyada oo loo marayo tusaalooyin muuqda. Waxaa la tusaaleeyay in weedhahan intooda badan ay ku badan yihiin halbeegyo sarbeeb ah (metaphors), waxaana si qoto dheer loo sharaxay muhiimadda ay leedahay in la fahmo oo la maareeyo odhaahyadan sarbeebta ah. Weedhahan, oo tusaale cad u ah xiriirka ka dhexeeya dhaqanka iyo luqadda af turkiga ah, waxay leeyihiin isticmaal ballaaran.

Af Turkigu wuxuu leeyahay erayo hodan ah oo lagu muujiyo xaalado kala duwan, sida marka la soo dhoweynayo martida, inta lagu jiro cuntada, marka la xanuunsanayo, marka geeri dhacdo, marka la safrayo, marka dhalasho dhacdo, iyo xaalado kale oo nolol maalmeedka ah. Tusaale ahaan, marka marti aad jeceshahay ay kuu timaaddo si ay kula joogto, iyo marka ay kaa tagto, waxaad tiraahdaa, **"Ilaahay hana wada kulmiyo mar kale."** Weedhani waa mid sarbeeb ah oo ka tarjumaysa rajada kulanka mustaqbalka. Waa muhiim in weedhahan si sax ah loo isticmaalo oo lagu meeleeyo xaaladda ku habboon.

Si aan ardayda uga caawiyo inay tan fahmaan, waxaan qoray weedho xurmad leh oo aan fasalka ku sharaxay macnahooda. Waxaan sidoo kale sameeyay xaalado kala duwan oo ardaydu ka shaqeeyaan, waxaanan ku dhiirri-geliyay inay aqoonsadaan erayada lagu isticmaali karo xaaladahaas gaarka ah. Wadajir ayaan uga wada hadalnay beddelka weedhahaas, waxaana isku daynay inaan helno kuwa ugu habboon. Waxaan bixiyay tusaalooyin kala duwan si aan u qoto-dheereeyo fahamka ardayda ee goorta weedhahan la isticmaalo.

Si aan casharka u sii xoojiyo, waxaan siiyay ardayda liis erayo ah oo si joogto ah nolol maalmeedka loogu isticmaalo, waxaana bixiyay sharaxaad ku saabsan erayadaas. Casharka xiga, waxaan qaybiyay su'aalo aan diyaariyay oo ku saabsan weedhahan iyo waxa lagu odhan karo xaalado kala duwan. Ardayda waxaa laga codsaday inay ka jawaabaan su'aalahaas, kadibna waxaan si wadajir ah uga wada hadalnay jawaabaha saxda ah.

Qaabka: Laba toddobaad oo shaqo fasalka ah

Hagaajin: Cilmi-baaristan waxaa loo adeegsan karaa kooxo kala duwan.

Qiimayn: Hawshan waxay ardayda siisay aragtiyo qiimo leh oo ku saabsan luqadda, dhaqanka, iyo xidhiidhka ka dhexeeya labadooda. Waxaan arkay in arday badan aysan isticmaalin ama aysan aqoon u lahayn weedho xurmad leh oo kaalin muhiim ah ku leh luqadda Turkiga. Waxaan ogaaday in qaar ka mid ah weedhahan aysan lahayn kuwo si toos ah ugu dhigma af Iswiidhishka,

taas oo ka dhigaysa mid adag in ardaydu si sax ah u isticmaalaan. Waxaan sidoo kale arkay in ardaydu ay ku dhibtoonayeen fahamka fikradaha ka dambeeya weedhahan. Maadaama weedhahan aanay ku jirin af Iswiidhishka, marar badan way ku adkaanaysaa ardayda.

Caqabad kale waxay ahayd in ardaydu ay ku dhibtoonayeen isticmaalka weedho sarbeeb ah. Qaar badan waxaa ku adkaaday inay isticmaalaan sarbeebaha oo ay ku daraan hadalkooda, gaar ahaan maadaama isticmaalka afkooda hooyo inta badan ku kooban yahay xaalado muuqda oo nolol maalmeed ah. Isla mar ahaantaana, hawshan waxay ardayda siisay fursad qiimo leh oo ay wax badan uga bartaan dhaqankooda iyagoo fahmaya weedhahan, kuwaas oo qayb muhiim ah ka ah dhaqanka Turkiga. Tusaalooyinka weedhahan waxay la xiriiraan dhaqanka martida, dhaqanka cuntada, caadooyinka ku xeeran dhalashada iyo geerida, iyo sidoo kale maalmaha gaarka ah iyo fasaxyada. Weedhahan dhaqameed aad bay ugu badan yihiin luqadda Turkiga, waxayna ahayd wax ardaydu fursad u heleen inay la qabsadaan inta lagu jiro casharrada.

Casharradan dhexdiisa, ardaydu ma aha oo kaliya inay barteen qaar ka mid ah weedhahan, balse sidoo kale waxaa lagu xusuusiyay dhinacyo muhiim ah oo ka mid ah dhaqanka Turkiga. Waxay garteen muhiimadda erayadan iyo sida ay u gudbiyaan macne dhaqan iyo bulsho oo qiimo leh. Ka dib markii ay barteen weedhahan xurmadda leh, arday badan waxay muujiyeen rabitaan ah inay si joogto ah ugu isticmaalaan marka ay ku hadlayaan af Turkiga. Waxay sheegeen inay hadda fiiro gaar ah u yeelan doonaan marka ay maqlaan erayadan oo ay isku dayi doonaan inay si fiican u fahmaan macnahooda. Ardayduna waxay sidoo kale carrabka ku adkeeyeen inay aad ugu faraxsanyihiin koorsadan, wax bandanna ka barteen, isla markaana ay heleen faham qoto dheer oo ku saabsan faahfaahinta dhaqanka Turkiga.